



**SUGIDDA NABDGALYADDA IYO DIB U  
HABAYNTA CAASIMADDA DALKA,**

***TAARIKH: 11 MARSO 2005***



## **SUGIDDA NABDGALYADDA IYO DIB U HABAYNTA CAASIMADDA DALKA,**

**Taariikh: 11/03/2005**

Sugidda Nabadgalyada, Maamul u sameynta, Xal u helidda iyo soocelinta awaamiirta iyo kala danbeynta ee caasimadda dalka ee Muqdisho, waa arrin aad u culus oo marar badan aad la isugu dayey, laguna guul dareystay, sababaha hoos ku qoran awgood:

- ❖ Wada tashii la'aan: Horay uma dhicin guud ahaan inta ay arintaan quseyso in ay go'aan mideysan ka gaaraan, markastaba dhinac ama shaqsi ayaa ka maqnaa.
- ❖ Aragti iyo fikrad siyaasadeed oo lagu mideysnaa oo la xiriirtay maamul u sameynta caasimadda dalka oo aan horay u jirin.
- ❖ Ayadoo dhinacyadii xamar isku heystay ay aamin sanaayeen dhinici xamar ku guuleysta inuu isla markaa noqonaayo hogaamiyaha qaranka. Sidaa daraadeed caasimadii u noqotay rahan.
- ❖ Jiritaan la'aan maamul qaran: maadaama 14-kii sano ee la soo dhaafay uu maqnaa maamul qaran oo lagu mideysan yahay, ma jirin cid awood u laheyd magacaabista maamulka gobolka Banaadir.
- ❖ Danta gaarka ah oo mar walba laga horeysiin jiray danta guud ahaaneed.

❖ Waxaa jiray faragalin dowlada shisheeye oo ka soo horjeeday daganaanshaha iyo maamul u sameynta caasimadda.

❖ Isku tanaasulid la'aan xal u helidda caasimadda.

Hadaba arrimaha kor ku xusan waxa ay horseedeen in jiritaanka umadda soomaaliyeed uu maanta Qatar ku sugan yahay loona baahan yahay in si deg deg ah loo nabadeeyo caasimadda maamulna loo sameeyo hubkana laga xareeyo isla markaana dib loogu soo celiyo u hogaansanaanta sharciga iyo kala danbeynta. Sidaa awgeed, iyadoo la tixgalinaayo natiijadii shir weynihii nabadeynta Soomaaliyeed oo ay dowladdu ka dhalatay lagana amba qaadaayo heshiiskii lagu gaaray hotelka Jakaranda 26 Janaayo 2005, ayaa waxaa si deg deg ah loogu dhaqaaqayaa wax ka qabashadda arimaha caasimadda, ugu horeyntana waxaa wada tashi lala sameenayaa inta ay quseyso arrinta haku sugnaadaan Nairobi ama meel kaleba.

## **TILAABOYINKA HOWLGALKA:**

1. waxaa si ku meel gaar ah loo dhisayaa guddiga hogaaminta arrimaha caasimadda ee ka kooban labada gole ee dowladda, isaga oo isku qeybinaya seddex guddi. Waxa uuna jirayaa inta laga dhisaayo maamulka lagana sugaayo amaanka Gobola Banaadir. Mudadisuna waa sagaashan casho, (90 maamuud) oo ka bilaabaneysa maalinta shaqadda la bilaabo waana la kordhin karaa hadii loo baahdo wuxuuna u qeybsamayaa seddex guddi oo kala ah:

**a) Guddiga nabad gelyadda iyo uruurinta maleeshiyooyinka iyo hubka.**

**b) Guddiga dhaqaalaha iyo taakuleynta**

**c) Guddiga abaabulka iyo wacyigalinta arimaha Bulshadda.**

Guddi kasta waxa uu yeelanayaa guddi hoosaadyo la shaqeenaya seddexda guddi, oo gacan ka siinaya howsha ay u xil saran yihiin .

wasaarad kasta oo dowladda katirsan Waxaa gacan lagu siinayaa shaqadeeda ku aadan gobolka Banaadir.

2. Waxaa la dhisaayaa maamulka gobolka Banaadir iyadoo la magacaabaayo guddoomiyaha gobolka, duqa magaaladda iyo inta maamul ee kale ee la xariirta, inta laga dhisaayo maamulkaas waxaa si kumeelgaar ah howsha u sii wadaya maamulka hadda wada, waxaana lagu saleenayaa axdiga iyo shuruucda Dalka.

3. waxaa loo baahan yahay magacaabidda:

**A. Taliyaha Booliiska Soomaaliyeed**

**B. Dhismaha hogaamada Booliiska Soomaaliyeed**

**C. Taliyaha qeybta guud ee gobolka Banaadir**

**D. Taliyeyaasha qeybaha gobolka Banaadir**

**E. Talisyada lixda dugsi ee tababarka maleeshiyada.**

Magacaabista sare ku xusan waxaa lala kashandoonaa cidda awooda u leh waxaana lagu saleenayaa axdiga iyo shuruucda Dalka.

4. waxaa la sameenayaa lix dugsi tababar maleeshiyo oo kala ah

**a) dugsi tababarka maleeshiyada ee geedtimir (gubadley)**

**b) Dugsi tababarka maleeshiyada ee hiilweyne**

**c) Dugsi tababarka maleeshiyada ee dugsi shanaad (Dayniile)**

**d) Dugsi tababarka maleeshiyada ee dhanaane**

**e) Dugsiga tababarka maleeshiyada ee lafoole**

**f) Dugsiga tababarka maleeshiyada ee carbiska**

Haddii loo baahdo xeryo dheeri ah waa lagu kordhinayaa

5. Dugsi kasta oo tababar inta aan lagu xareyn maleeshiyada waxaa lageynayaa 100 askari oo booliskii hore ah oo iskugu jira: talis, tababarayaal iyo kuwa u xil saran keydinta iyo qabashadda hubka maleeshiyada iyo amaanka dugsiga
6. Tirada guud ee maleeshiyada la xareenaayo waa 15kun waxaana laga xareeynayaa magaala madaxda dalka ee muqdisho (Xamar)
7. Tirada guud ee ciidamada boolisska ee saldhigyada gobolka Banaadir waa 700boqol oo askari ( $14 \times 50 = 700$ )

- **Dugsiga tababarka maleeshiyada 600 oo askari**
- **Talisyada ilaalinta xarumaha dowladda iyo goobaha ilaha dhaqaalaha 400 oo askari**
- **Ciidanka ilaalada xabsiyada 300 oo askari**

Wadarta Guud ee booliskii hore iyo asluubta waa 2000 (laba kun) oo askari.

8. Maleeshiyada tababarada loo furaayo waxa ay ka soo xeroonayaan:

- **Hogaamiyeyaasha,**
- **Maxkamadaha**
- **Ganacsatada**
- **Siyaasiyiin iyo ciddii kale ee hubeysan.**

9. waxaa la diyaarinayaa foom ay soo buuxinayaan kooxaha sare ku xusan ee soo xareynaya maleeshiyada, waxaana ku cad foomkaas:

- ✓ **Tiradda guud ee maleeshiyada uu hayo**
- ✓ **Tirada maleeshiyo ee uu soo xaeynaayo**
- ✓ **Tirada nuucyada hubka kala duwan ee uu hayo**
- ✓ **Iyo tirada iyo nuucyada hubka e uu la soo xareeyey maleeshiyada**

10. Marka maleeshiyada iyo hubkeeda la soo xareeyo, waxaa keydinta iyo amaanka hubka gudoomaya ciidamada booliiska ee horay loo geeyey dugsiga tababarka.
11. Waxaa la magacaabayaa guddi khubura ah ee isugu jira soomaali iyo ajanabi oo waajibkiisuna yahay qiimeynta hubka nuucyadiisa kala duwan si dowladdu u iibsato ulana wareegto. Gudigaas waxa ay la shaqeynayaan wasaaradda ku shaqada leh.
12. Waxaa la abaabulayaa lana howl galinyaa si kumeel gaar ah maamuladda 16-ka degmo e gobolka Banaadir si ay nabad gelyadda iyo wacyi galinta guud ahaaneed uga qeyb qaataan.
13. Waxaa laga soo xulayaa 16-ka dugsii tababar, ciidan ka kooban 684 askari oo ku hubeysan 42-gaari oo tiknika ah oo 12 ka mid ah ay tahay gawaarida nuucyada waaweyn, 30 ka mid ahna ay tahay nuucyada yar yar. Ciidankaan waxaa loo tababarayaa si gaar ah waana ciidanka gurmada. Waxayna u xilsaran yihiin amniga iyo sugidda nabad gelyadda caasimadda, waxaa ayna si toos ah u wada shaqeynayaan ciidamadda booliiska ee saldhigyada. haddii loo baahdo ciidan kale iyo hub kale oo dhaaraad ah waa lagu kordhin karaa.

14. Waxaa la dhisayaa maxkamadaha degmooyinka iyo midda gobolka waxaana la howlgalinayaa xabsiga dhexe.
15. Dayactirka 6-da dugsi ee tababar, qarashka maamul iyo miisaaniyadda ciidanka waxaa loo raacayaa sidii golaha wasiirada ay horay ay ugu gudbiyeen hay'adaha caalamiga ah.
16. Waxaan diyaar u nahay haddaan nahay labada gole ee dowladda in aan si deg deg ah ugu noqono caasimadda una xareyno maleeshiyada, waxana ka codsaneynaa beesha caalamka in ay gacan naga siiso dhaqaalihii horay looga codasaday, la'aantiisna ay suurta galeynin fulinta howlahaas.
17. Waxaa la dhisayaa maamulada dekedda iyo garoonka diyaaradaha si markii amaanka la sugu deg deg ay ugu howlagalaan.
18. waxaa la sugayaa lana hubinayaa amaanka caasimadda iyadoo la soo celinaayo sharciga iyo kala dambeynta.
19. waxaa markaa lafurayaa dekedda muqdisho iyo gegidda diyaaradaha caalamiga ah.
20. waxaa loo howlgalayaa daraasadda iyo wax ka qabashadda adeegyadda bulshadda sida nadaafadda guud, Biyaha, Korontada, Isbitaaladda, Dugsiyada Waxbarashada IWM.
21. Waxaan ku talineynaa in howlaha kor ku xusan dhammaan gobolada dalka si isku mar ah looga wada fuliyo si aysan ugu muuqan hub-ka-dhigistu arrin ku wajahan dad gaar ah iyo degaamo gaar ah.
22. waxaan oggol nahay in hubkii la uruuriyey lana xareeyey lagu wareejiyo keydintiisa, haddii loo baahdo, ciidamadda shisheeye, marka ay yimaadaan dalka, oo aysan ka mid aheyn wadamada xuduuda la leh soomaaliya bad iyo bariba. Waxaana xusid mudan, hubkii lagu wareejiyey

ciidamada shisheeye in aysan burburin karin, iibin karin, isticmaali karin, cid gaar ahna ayan siin karin, waxayse ku wareejinayaan gacanta dowladda soomaaliyeed.

23. Waxaanaan marnaba aqbali doonin in ay dalkeena yimaadaan ciidamada wadama Soomaaliya xuduuda la leh bad iyo bariba.
24. waxaanan ogolaaneynin in Baarlamaanka la keeno dood ku saabsan ciidamadda dowladaha xuduudka leh soomaaliya bad iyo bariba in ay dalka yimaadaan, iyadoo arrintaas horay looga heshiiyey shirweynihii dib u heshiisiinta ee socday mudada labada sono aheyd ee lagu dhisay dowladda federaalka kmg soomaaliyeed.
25. Waxaan caddeyneynaa in aysan dhib ku ahayn dowladda, dib ugu noqoshada magaalo madaxda dalka kana howlgali karto, Iyadoo la adkeenayo amaanka iyo nabad galyada
26. Waxaa xushmad iyo qadarin mudan dhamaan *Siyasiyiinta, Bulshada Rayadka, Ganacsatada, Maxkamadaha, Culumaa'udiinka, Dhaqanka, Haweenka, iyo Dhalinyaradda*, oo isku diyaariyey sidii ay u fulin lahaayeen howlaha nabad galyada iyo maamul u sameynta gobolka banaadir iyo xareynta maleeshiyooyinka.
27. Waxaan si gaar ah codsi ugu jeedineynaa dhammaan *Warbaahinta Madaxa Banana, Wargeysyadda, Web-Site-Yada, Fanaaniinta, Abwaaniinta* Soomaaliyeed in ay ka qeyb qaataan soocelinta nabadeynta ummadda soomaaliyeed, gaar ahaan magaalo madaxda Dalka.
28. Waxaan u mahad celineynaa dhammaan cid kasta oo ka geysatay gacan dib u hehiisiinta iyo xal u helidda dhibaatooyinkii daba dheeraaday ee umadda

soomaaliyeed sida:, **Dowladda Kenya iyo shacabkeeda, Dowladaha IGAD, EU, AU, Jaamacada Carabta, UN, USA.**

29. Ugu danbeyn annaga oo ku kalsoon gacan ka helidda dowladda iyo shacabka Soomaliyeed iyo Beesha caalamka, ayaan halkaan waxaan ku balan qaadeynaa fulinta iyo meel marinta howlaha kor ku xusan

## **Saxiixayaasha**

1. Hon. Hussein Mohamed Farah Aidid \_\_\_\_\_
2. Hon. Mohamed Qanyare Afrah \_\_\_\_\_
3. Hon. Muse Sudi Yalahow \_\_\_\_\_
4. Hon. Osman Hassan Ali (Ato) \_\_\_\_\_
5. Hon. Omar Moh'ud Moh'ed (finish) \_\_\_\_\_
6. Hon. Mohamed Hussein Addo \_\_\_\_\_
7. Hon. Botan Isse Alin \_\_\_\_\_
8. Hon. AbdiKarim Ahmed Ali \_\_\_\_\_
9. Hon. Omar Hashi Adan \_\_\_\_\_
10. Hon. Mohamud Salad Noor \_\_\_\_\_
11. Hon. Ali Abdullahi Osoble \_\_\_\_\_
12. Hon. Mohamed Moh'ud Guled \_\_\_\_\_
13. Hon. Salah Ali farah \_\_\_\_\_
14. Hon. Yusuf Mire Moh'ud (Serar) \_\_\_\_\_
15. Hon. Mohamed Jama Furuh \_\_\_\_\_
16. Hon. Abdi Ahmed Dhuhulow \_\_\_\_\_
17. Hon. Osman Mohamud Mohamed \_\_\_\_\_
18. Hon. Ali-Bashi omar Rooraaaye \_\_\_\_\_
19. Hon. Ahmed Diriye Mohamed \_\_\_\_\_
20. Hon. Hassan Dhimbil Warsame \_\_\_\_\_
21. Hon. Ing. Nur Wabar Abdi \_\_\_\_\_
22. Hon. Ibrahim Sheikh Ali Mohed \_\_\_\_\_
23. Hon. Abdi Bulle Hussein \_\_\_\_\_
24. Hon. Abdiazis Ibrahim Osman \_\_\_\_\_
25. Hon. Abdifatah Ahmed Mumin \_\_\_\_\_
26. Hon. Abdulkadir Nur Arale \_\_\_\_\_
27. Hon. Abdullahi Moalim (Fah) \_\_\_\_\_

28. Hon. Ahmed duale Gelle (Haaf) \_\_\_\_\_
29. Hon. Ahmed Omar Gagale \_\_\_\_\_
30. Hon. Ali Alas Qareey \_\_\_\_\_
31. Hon. Ali Jeyte Osman \_\_\_\_\_
32. Hon. Ali Shire Osman \_\_\_\_\_
33. Hon. Asha Haji Ilmi \_\_\_\_\_
34. Hon. Bashir Mohamed Aden \_\_\_\_\_
35. Hon. Farahan Ali Mohamud \_\_\_\_\_
36. Hon. Hirsi Adan Rooble \_\_\_\_\_
37. Hon. Hussein Abdi (Wade) \_\_\_\_\_
38. Hon. Hussien Arale Adan \_\_\_\_\_
39. Hon. Ibrahim Habeeb Noor \_\_\_\_\_
40. Hon. Isse Weheliye Malin \_\_\_\_\_
41. Hon. Mariam Arif Qassim \_\_\_\_\_
42. Hon. Mohamed Hassan (qoono) \_\_\_\_\_
43. Hon. Mohamed Hussein Rage \_\_\_\_\_
44. Hon. Moh'ed Abdirahman (Nadiif) \_\_\_\_\_
45. Hon. Mohamed Sh. Jama Nageye \_\_\_\_\_
46. Hon. Omar Adan (Omar dhere) \_\_\_\_\_
47. Hon. Mohamed Sheikh (Gabiyow) \_\_\_\_\_
48. Hon. Moh'ed Sh isaq (Abadir) \_\_\_\_\_
49. Hon. Muse Nur Amin \_\_\_\_\_
50. Hon. Abdullahi Gedi Shador \_\_\_\_\_
51. Hon. Muse Ali Omar \_\_\_\_\_
52. Hon. Mustafe Sh. Ali Duhulow \_\_\_\_\_
53. Hon. Nur Ahmed Dirshe \_\_\_\_\_
54. Hon. Hilowle Iman Omar \_\_\_\_\_
55. Hon. Omar Islow Mohamed \_\_\_\_\_
56. Hon. Omar Ugas Mumin \_\_\_\_\_
57. Hon. Salad Ali Jelle \_\_\_\_\_
58. Hon. Yusuf Gelle Ugaas \_\_\_\_\_
59. Hon. Abdirahman Abdi Warre \_\_\_\_\_
60. Hon. Abdullahi Ahmed Afrah \_\_\_\_\_